# Su'aalaha inta badan la iska waydiiyo DOL REAL ID

8-da Agoosto 2023

**Waa maxay REAL ID?**

REAL ID ama Aqoonsiga dhabta ahi waa sharci federaal ah, ee ma ahan nooc aqoonsi dhab ah. Sharcigan wuxuu kordhiyaa tallaabooyinka amniga iyo nabadgelyada, wuxuuna xaqiijinayaa aqoonsiga. Wax badan ka ogow shuruucda REAL ID iyo noocyada aqoonsiyada ee buuxiya shuruudaha.

**Maxaan ugu baahanahay dukumiinti waafaqaya shuruucda REAL ID?**

Xeerka REAL ID ama aqoonsiga dhabta ahi wuxuu dejiyaa heerarka ugu yar ee amniga ee shatiga darawalnimada iyo kaararka aqoonsiga ee maamul goboleedku bixiyo. Sharciga Federaalka wuxuu fari doonaa qof kasta oo ku safraya diyaarad ama booqanaya xarumaha federaalka qaarkood inuu isticmaalo dukuminti waafaqaya shuruucda REAL ID laga bilaabo Maajo 7, 2025. Xitaa haddii aadan diyaarad ku safraynin, waa inaad weli heysataa dukumintiyadaada waafaqaya shuruucda REAL ID ama aqoonsiga dhabta ah si aad u haysato aqoonsigaaga, haddii ay timaado baahi safar oo degdegga ah.

**Maxaan u baahanahay inaan ugu hoggaansamo shuruucda REAL ID ama aqoonsiga dhabta ah?**

Aqoonsiyadan hoose waxay buuxinayaan shuruucda REAL ID ama aqoonsiga dhabta ah, waxaana loo isticmaali karaa in lagu raaco duulimaadyada gudaha:

- Sharciga isugu jira Darawalnimada iyo Muwadinimada (EDL)
- Kaadhka aqoonsiga ee cadaynaya Muwadinimada (EID)
- Aqoonsiga Militariga Mareykanka
- Baasaboorka Mareykanka
- Kaadhka Baasaboorka Mareykanka
- Kaarka Deganaanshaha Joogtada ah (Kaarka Degenaanshaha)
- Aqoonsiga Sawirka leh ee Federaalku Aqoonsanyahay, Qabiilku Soo Saaray
- Kaarka Oggolaanshaha Shaqada ee Waaxda Adeegyada Dhalashada iyo Socdaalka ee Mareykanka (I-766)
- Baasaboor ajaanib ah

Eeg dhamaan liiska dukumiintiyada la aqbalayo ee safarka hawada.

**Weli ma heli karaa shatiga darawalnimada iyo kaarka aqoonsiga caadiga ah?**

Haa, waxaan sii wadi doonnaa bixinta shatiga darawalnimada caadiga ah iyo kaararka aqoonsiga oo ay dadka deggan Washington u isticmaali karaan aqoonsi ahaan ama kaxaynta baabuurta. Shatiga darawalnimada caadiga ah iyo kaarka aqoonsigu ma tilmaamayaan xaalada degenaanshaha ama sharciga qofka. Laga bilaabo May 7, 2025, kadib lama aqbali doono noocyada aqoonsiyada kala duwan ee loogu talagalay in lagu raaco duulimaadyada gudaha.

**Duulimaadyada gudaha maku safri karaa anoo isticmaalaya shatigayga darawalnimo ee caadiga ah?**

Maya, marka uu dhaqan galo sharciga REAL ID ma awoodi doontid inaad raacdo duulimaadyada gudaha adiga oo isticmaalaya shatiga darawalnimada ee caadiga ah ilaa inuu yahay sharciga isugu jira shatiga darawalnimada iyo muwaadinimada maahe ama uu yahay dukumeenti kale oo waafaqaya shuruucda REAL ID ama aqoosinga dhabta ah.

**Ma awoodi karaa inaan dhulka ku safro anigoo isticmaalaya shatigayga darawalnimada ee caadiga ah?**

Haa, noocyada kale ee safarka, sida ku safarka dhulka adigoo maamul goboleed kale utalaabaya ama raacista tareenka, uma baahna aqoonsi waafaqaya REAL ID ama aqoonsiga dhab ah. Shatiga darawalnimada caadiga ah iyo kaararka aqoonsiga ayaad isticmaali kartaa.

**Waa maxay farqiga u dhexeeya Aqoonsiga isugu jira Darawalnimada iyo muwaadinimada (EDL) iyo Aqoonsiga cadaynaya muwaadinimada (EID)?**

EDL ama EID waa nooc aqoonsi ah oo leh astaamo amni oo la xoojiyay kuwaas oo muujinaya caddaynta aqoonsiga iyo muwaadinimada. Tilmaamaha la xoojiyay waxay waafaqsanyihiin shuruucda REAL ID ama aqoonsiga dhabta ah. EDL/EID waxay buuxiyaan shuruudaha federaalka laga rabo REAL ID ama aqoonsiga dhabta ah waana beddelka la ansixiyay ee baasaboorka ama kaarka baasaboorka, kuwaas oo Maraykanka dib loogu soo geli karo xuduudaha dhulka iyo badda ee u dhexeeya Maraykanka, Kanada, Mexico, Bermuda, iyo Kariibiyaanka.

**Yaa heli kara EDL ama EID?**

Waa inaad tahay muwaadin Mareykan ah oo aad keentaa Lambarka Amniga Bulshada, cadeynta dhalashada, caddeynta aqoonsiga, iyo caddeynta degenaanshaha Gobolka Washington. Ka dib markaad soo aruuriso dukumiintiyadaada, ballan aad codsiga ku gudbisato ka qabso xafiiska shatiga darawalnimada ee kuugu dhow.

**Miyaan u baahanahay inaan helo EDL ama EID?**

Haddii aadan qorsheyneynin inaad duulimaadyada gudaha ku safarto, ama aad horey u haysatey dukumiinti aqoonsi ah oo la aqbali karo, waxaa laga yaabaa inaadan u baahnayn EDL ama EID. Shatiga darawalnimada ee caadiga ah ayaa kuu ogolaan doona inaad baabuur kusii wado, aqoonsigaaga caadiga ahna wuxuu sii ahaan doonaa mid maamul goboleedka gudihiisa ushaqeeya qaab aqoonsi sax ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa fiican inaad ka diyaargarowdo marxaladaha sida marka ay soo baxaan baahiyo socdaal oo lama filaan ah.

**Sideen ku ogaan karaa in shatigayga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga aanu waafaqsanayn shuruucda REAL ID ama aqoonsiga dhabta ah?** Waxaan bilownay in aan shatiga darawalnimada caadiga ah iyo kaararka aqoonsiga ku calaamadeyno "Federal limits Apply" bishii Luulyo 2018 dhanka geeska sare ee midig. Hubi kaaga si aad u aragto inay ku qorantahay iyo inkale.

Wax badan ka baro REAL ID ama aqoonsiga dhabta ah.

**Ma u baahan tahay caawimo dheeraad ah? Halkan ayaad nagala soo xiriiri kartaa.**

**Taleefanka:** 360-902-3900
(TTY: Wac 711)